# Sida Looga Qaybqaato Gudiyada Dugsiga iyo Kooxaha

Marka qoysaska iyo macalimiintu wada shaqeeyaan, caruurtu waxay u badan tahay inay guulaystaan, soo xaadiraan dugsiga maalin kasta, oo ay dareemaan inay xiriir la leeyihiin ardayda ay isku fasalka yihiin iyo macalimiintooda. Waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha ku lug leh dugsiga waxay dareemayaan inay qayb ka yihiin bulshada dugsiga. Hal hab oo muhiim ah oo qoysaska qaar ay u doortaan inay ka qaybgalaan dugsiga ilmahooda waa inay ku biiraan koox ama gudi ka jira dugsi. Waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha waxay awoodaan inay la kulmaan qoysaska kale oo ay la shaqeeyaan macalimiinta iyo maamulayaasha si ay go'aano uga gaaraan dugsiga ama degmada.

## Sidee ayaan uga qeybqaadan karaa?

### Soo xaadir kulanada kooxaha waalidka.

Inta badan dugsiyada, waxaa jira kooxo waalidiinta iyo daryeel bixiyayaal ah oo kulmo. Kooxahan, waalidiinta iyo shaqaalaha dugsigu waxay ka wada hadlaan walaacyadooda ay qabaan waxayna qorsheeyaan hawlo lagu taageerayo dhamaan ardayda, macalimiinta, iyo qoysaska dugsiga. Mararka qaarkood kooxaha waalidku waxay diirada saari karaan mawduucyo gaar ah ama kooxo dhaqan ahaaneed.

> Mararka qaarkood kooxda waxaa laoou magacaabi karaa Ururka Waalidiinta iyo Macalimiinta (PTA) ama Ururka Waalidka iyo Macalimiinta (PTO).

### Ku biir kooxda hogaanka dugsiga.

Gudaha Ohio, dugsi kasta wuxuu leeyahay kooxo ka wada shaqeeya horumarinta dugsiyadooda. Kooxuhu waxaa kamid ah inta badan shaqaalaha iyo maamulayaasha dugsiga, xubnaha bulshada, iyo wakiilada qoyska. Haddii aad danaynayn inaad kamid noqoto kooxda hogaaminta dugsiga, waxaad waydiin kartaa macalinka ilmahaaga, maamulaha dugsiga, ama waalid kale fursadaha ka jira dugsigaaga ama degmadaada.

Waalidiinta iyo qoysaska adiga oo kale ah ayaa ku biiri kara kooxahan. Waxaad la wadaagi kartaa talooyinka iyo fikradaha muhiimka ah hogaamiyayaasha dugsiga. Waalidiinta ama daryeel bixiyayaasha kamidka ah kooxaha dugsiga waxay ka caawiyaan dugsiyada inay gaaraan go'aamo muhiim ah. Waxay taageeraan isbedalka si loo horumariyo dugsiga iyo waxbarashada. Hoos waxaa ku yaal macluumaadka ku saabsan noocyada kooxaha aad ka heli karto dugsigaaga.

### Kooxda Hogaanka Degmada

Kooxdan waxaa kamid ah shaqaalaha dugsiga, iskaashatada bulshada, iyo hogaamiyeyaasha dugsiga. Waxay kormeeraan degmo dugsiyeedka. Kooxdani waxay diirada saartaa isbedalada saameeya dhamaan degmo dugsiyeedka.

### Dhisitaanka Koox Hogaamin

Kooxda dhisitaanka hogaaminta waxaa kamid ah shaqaalaha dugsiga, macalimiinta, iyo hogaamiyayaasha dugsiga. Hogaamiyayaashan waxaa kamid ah maamulaha iyo maamulka dugsiga. Kooxdani waxay diirada saaraan isbedalada hal dugsi.

### Kooxda Wax ka qabashada iyo Taageerada hab-dhaqanka Wanaagsan

Dugsiyada Ohio waxay leeyihiin kooxaha Wax ka qabashada iyo Taageerada hab-dhaqanka Wanaagsan (Positive Behavioral Interventions and Supports, PBIS). Waxay la shaqeeyaan qoysaska iyo shaqaalaha dugsiga si ay u hubiyaan in dugsigu isticmaalayo dhaqamada taageeraya fayo-qabka iyo waxbarashada arday kasta.

## Waa maxay su'aalaha aan waydiin karo dugsiga?

- Waa maxay habab kala duwan ee aan uga qaybqaadan karo dugsiga?
- Yaan wax ka weydiin karaa sida aan uga qaybqaadan karo dugsiga?
- Miyaan u baahanahay inaan aqaano Ingiriisiga si aan uga qaybqaato?
- Sidee ayaan si ikhtiyaari ah ugu shaqayn karaa dugsiga?
- Waa maxay kooxaha waalidka ama qoyska ee aan ku biiri karo?

[Copyright] ©2024 Center on Education and Training for Employment, The Ohio State University 

## Maxaa dhacaya haddii aanan ku fiicnayn ku hadalka Ingiriisiga?

Dugsiyadu waa inay qoysaska siiyaan turjubaano. Turjubaanadu waxay caawin karaan qoysaska inay la hadlaan macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga. Dugsigu waxay sidoo kale siin karaa turjubaano la heli karo inay qoysaska ka caawiyaan munaasabadaha dugsiga. Waxaad sidoo kale oo aad ka codsan kartaa fasiraada ama turjumaada dugsiga si kharash la'aan ah. Wax badan ka ogaw qaybta Isticmaalka Turjubaanadayada.

## Kheyraad Dheeraad ah

- Kheyraadkan Colorin Colorado wuxuu sharxayaa sida waalidiinta iyo qoysasku uga qaybqaadan karaan dugsiga ilmahooda. https://www.colorincolorado.org/article/parent-participation-how-get-involved-your-childs-school-activities
- Websyatka Hello USA wuxuu sharxayaa sida waalidiintu u taageeri karaan waxbarashada ilmahooda. https://usahello.org/education/children/help-child-in-school
- Hagitaankan Ready4K wuxuu ku saabsan yahay ku dhex jiritaanka dugsiyada iyo ka qaybqaadashada waxbarashada ilmahaaga. https://learn.ready4k.com/school-newcomer-resource
- Websaytkan Raising Language Learners ayaa bixiya fikradaha ka qaybqaadashada waxbarashada ilmahaaga. https://raisinglanguagelearners.com/ideas-to-participate-in-your-childs-education

*Khayraadkan waxay ujeedadoodu tahay inay xoojiyaan tacliinta, fayo-qabka ardayda iyo kuliyada iyo natiijooyinka shaqada ee ardayda luuqadaha badan ku hadla ee Ohio. Khayraadka waxaa lagu sameeyay dadaal iskaashi oo u dhexeeya Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) iyo Ohio State University's Center on Education and Training for Employment oo ay weheliso koox u heelan oo u doodaha qoyska, hogaamiyeyaasha bulshada, shaqaalaha dugsiga degmada, iyo macalimiinta.*

[Copyright] ©2024 Center on Education and Training for Employment, The Ohio State University 